Guga 2021

Balaarinta xiriiriyaha Federal Way

1 Wuxuu furmayaa 2024

Mudo intee in le'eg ayuu qaadan doonaa socdaalkayga sanadka 2024?

Tareen ayaa soo mari doonaa

6-8 daqiiqo

oo kasta maalmaha shaqada saacadaha dadku ugu badan yihiin

Tareen kasta oo afar isjiid ahiba waxa uu qaadi karaa…

- 800 oo rakaad
- 16 kursi curyaan
- 8-12 baaskiiladood
- Shandado badan

Nidaamka isku xidhka tareenka fudud ee Mutaqbalka

Su'aalo?

La xiriir kooxdeena hawl gelinta bulshada:
fwle@soundtransit.org or 206-398-5300

Wax badan ka ogoow mashruuca isqorna si aad aqbaar iimayl ugu heshid.

soundtransit.org/fwlink

Turjubaan 800-823-9230

Español Tagalog русский язык
漢語 한국어 日本語 Tiếng Việt

Sawiro si aad macluumaadkan u aragto

Документ на русском языке | Tài liệu bằng tiếng Việt | English document | 한국어 문서 | Documento en español

简体中文文件

401 S. Jackson St., Seattle, WA 98104
800-201-4900 / TTY: 711
Iimayl: main@soundtransit.org
Bogga intarneetka: soundtransit.org

Macluumaad aad ku heli karto qaabab kale: 800-201-4900 / TTY: 711
Iimayl: accessibility@soundtransit.org

Nagala soco:

SOUNDTRANSIT

Gadiid badan oo loogu talagalay in lagu kobciyo South Sound

Wadada Sound Transit ahna 7.8-mayl ee Habka Balaarinta Federal Way waxay isku xirtaa Kent/Des Moines, Koonfurta 272nd Street, xarunta Gaadiidka ee Federal Way iyo bulshada ku hareersan nidaamka gaadiidka gobalka ee ku siifidaya 116 mayl. Adeegu wuxuu bilaabanayaa sannadka 2024.

Faa'iidooyinka Mashruuca

» Waxa uu bixiyaa adeeg isku halaynleh oo joogto ah kaas oo soo mara lix ilaa sideedii daqiiqoba saacadaha dadka ugu badan yihiin ee shaqada.

» Wuxuu fududeeynayaa inaad iskaga gooshtid Xarunta Gaadiidka ee Federal Way iyo Madaarka ama gegida diyuuradaha ee Sea-Tac muddo 16 daqiiqo ah.

» Waxaa laga helaa fursado badan oo laxariira shaqooyinka, iskoolaadka, dukaamaysiga iyo dhacdooyinka dhamaan gobalka kadhaca.

» Heshiiska naqshadeeynta halka mar ayadoo dhisiduna la macno tahay hab shaqo oo ah, hormarinta hal abuurka iyo bixinta mashruuca si dhaqso ah.

Waxyaabaha ay Boosteejadu leedahay

» Jidad cusub oo bannaan korna u qaadaya helitaanka adeegyada.

» Goobo cusub gawaarida la dhigto (baarkino) ka kooban 3,200 kuwaas oo u sahlidoona dadka isticmaalaya gaadiidka dadwaynaha meelahay gawaaridooda dhigan lahaayeen gaar ahaan goobaha dadka laga qaado iyo meelaha lagu dajiyo.

» Boostada waqooyi Galbeed oo leh naqshad casri ah, oo ka samaysan dhalo soo gudbinaysa qoroxda dabiiciga ah iyo meel dadan oo kuu sahlaysa inaad roobka ka dugsato ama ka hoosgasho.

» Shirkadaha dhismaha biraha ee leh dhamaystir kulul.

» Shaqooyinka qaaska ah ee farshaxanka oo ay sameeyaan farshaxaniistayaal qaranka ayagoo ku muujiya dhiiro galiyana taariikhda, dabiiciga iyo goobaha dabiiciga ah ee boosteejada.

» Xarumaha basaska oo si fudud oona dhib la'aan loogu kala wareegi karo.

Maxaa dhacaya

Marka Sound Transit ay diyaarinayso siday u bilaabi lahaayeen dhismaha, waxaa u diyaargaroowdaa inaad aragto waxyaabahaan soosocda:

» Qodidda shakalada, taagista tiirarka iyo isku xirayaasha wadada oo dhan si jidka tareenka kor loogu qaado.

» Bilaabista shaqada saldhigga tareenka.

» Bilaabista dhisidda xoojiyaha darbiga

» Sii wadida nadiifinta iyo qiimaynta ballaaran si loogu diyaar garoobo dhisidda jidka tareenka.



Balaarinta xiriiriyaha Saldhigyada Federaalka Way

Kent/Des Moines

Saldhigyada tareenka sare ee Kent/Des Moines oo u sahlaysa isaga socodka jaamacada(koleejka) Highline iyo agagaarka dadka dariska la ah iyo ganacsatada. Fikrada naqshada qaab dhismeedka agagaarka saldhigga oo ay ka mid yihiin saddex wado oo cusub kuwaasoo u sahli doona,ku lugeeyayaasha, baaskiileeyda iyo ku hakadayaasha ku kala badasha gaadiidka, labomeelood oo waawayn ee fadhiga iyo farshaxanka dadwaynaha. Qaybta labaad waxay leedahay 500 goobo banaan oo baabuurta la dhigto kuna yaala meel daddan oo la fadhiisto.

Koonfurta 272nd Street

Wuxuu kuyaala Lake Park-iyo-Qaybta laga raaco koonfurta 272nd ee boosteejada taasoo leh 1,100 goobo banaan oo gawaarida la dhigto,waxayna badelaysaa goobtii dibada ahayd ee baabuurta la dhigan jiray, qaybta gadaal laga dhisayna waa jidka koonfurta 272nd. horumarkaan ayaa u sahlaya baabuurta/basaska isticmaala boosteejadaan, Qaybaha koonfurta 26th Avenue iyo koonfurta 28th Avenue.inay lahaadaan meelo wadada geeskeeda ah ee lagu socdo kuwaasoo qaabka loo dhisay loola dan lahaa meelo luqays iyo marin baaskiileed, taasoo u sahlaysa kuwa lugaynaaya iyo baaskiileeydaba badalashada gaadiidka iyo uga bixidda boosteejada ee dhanka wadada wayn(freeway) ee basaska istaagaan.

Xarunta Gaadiidka ee Federal Way

Waxay kutaala bartamaha magaalada, xarunta boosteejada Gaadiidka ee Federal Way waxay u adeegtaa ganacsiyada jira iyo goobaha udhaw. Boosteejadu waxay ka dhaxaysaa una adeegtaa basaska iyo tareenada. waxaa kaloo u dhow goobtii hore ee gawaarida la dhigan jiray 400 oo meelood oo cusub oo gawaarida la dhigan doono. Jidadka cusub ee wadada ayaa kor u qaadaysaa tegista saldhigga waxayna dhalin doontaa mustaqbalka fursad hormarineed.

Wax badan ka ogoow mashruuca isqorna si aad aqbaar iimayl ugu heshid:

soundtransit.org/fwlink